

WASAARADDA WAXBARASHADA IYO TACLIINTA  
SARE

IMTIXAANKA FASALKA 4AAD, 2011

AF-SOOMAALI



XAFIISKA IMTIXAANAADKA PUNTLAND

MAGACA: .....

DUGSI: .....

ROOL LAMBAR: .....

DAWLADDA BUNTILAAN

WASAARADDA WAXBARASHADA

XAFIISKA IMTIXAANKA

IMTIXAANKA AF SOOMAALIGA FASALKA AFRAAD EE DUGSIGA SARE

2011

AMIN: 2 SAAC

LAGU DARAY 10 DAQIIQO OO WARQADO AKHRIS AH

TILMAAMAHAA IMTIXAAN-GALAHAA:

WAXAA IMTIXAANKU KA KOOBAN YAHAY 15 BOG. BOGGA LABAAD WAA  
FEEGAAR LAMA SAXAYO WIXII LAGU QORO. TIRI BOGAGGA, HADDAY  
WAX KA MAQAN YIHIIN ILAALIYAHU U SHEEG.

WUXUU IMTIXAANKU KA KOOBAN YAHAY 7 QAYBOOD OO KALA AH

SIDAAN:

I.	SHEEKO .....	20 DHIBCOOD
II.	NAXWE .....	20 DHIBCOOD
III.	HEES HAWLEEDYO .....	10 DHIBCOOD
IV.	MAAHMAAHYO .....	08 DHIBCOOD
V.	GABAYO .....	16 DHIBCOOD
VI.	GOOGAALAYSI DHAQAMEED .....	06 DHIBCOOD
VII.	MAANSO .....	05 DHIBCOOD
VIII.	CURIS .....	15 DHIBCOOD

## FEEGAAR

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

## QAYBTA KOOWAAD

(20 dhibcood)

### SHEEKO

Akhri sheekadaan iskuna day inaad fahamto, dabadeedna ka jawaab  
dhammaan su'aalaha kaaga iman doona.

Waa waajib saran qof kasta inuu tixgelin siiyo waxyaabaha ay nolosheenu ku xiran tahay. Waxaa la ogaaday in waxa aan maanta sameeyynno ay raad ku yeelan doonaan aayaheenna berrito. Markii aynnu fiirinno deegaanka inaku meeraysan, ee aynu ku dhix nool nahay, sida aynu u adeegsanna waa si aad u fool xun oo cirib-dambeed-xumo keenaysa. Isbeddelka cimilada waxaa ka dhasha abaaro. Allaah ayaa keena abaarta mana baajin karno, haseyeeshee dhibaatada isticmaal xumada deegaanka ka dhalata ayaa cimilada isbeddelkeeda saameyn weyn ku leh. Dhulka marka dhirta laga xaalufiyo waxaa ka dhasha carra-guur. Carro-guurka waxaa keena dadka oo aan aqoon sida habboon ee loo adeegsado deegaanka. Tani waa dhibaato weyn oo ka jirta dalkeenna ayna sababtay dadkeenna oo aan dhawrin deegaanka iyo dawladda oo aan xil weyn iska saarin ilaalinta deegaanka. Haddii aysan dadku ka fekerin mustaqbal ka waxa ku dhici doona dalkeenna marka aan deegaanka la dhawrin waxaa si degdeg ah loo dhaxli doonaa dalka oo noqda lama degaan iyo dadka oo saboolnimo ku dambeeyaa. Carra-guurku waa ciidda nafaqada leh oo laga waayo dhulka korkiisa. Carrada sare ee dhulka waxaa ku jira nafaqo badan. Berigii hore dadku ma aysan aqoon waxyaabaha dhaliya carra-guurka, sidaa darteed lama qaadi jirin taallaabooyin lagu joojinayo carra-guurka. Carra-guurka waxaa dhaliya arrimo ay ka mid yihiin biyo daad ah iyo dabeylo. Nooc

kasta oo dhir ihi waxay joojin karaan carraddii biyuhu qaadi lahaayeen; dhirtaasi ha noqoto dhir gaagaaban sida cawska ama dhir dheer dheer sida quraca, higlada, iwm. Dhirtu waxay hakisaa xawliga biyaha waxayna kaliftaa in biyihu si tartiib ah u socdaan. Sidoo kale dhirtu waxay hakisaa ama yaraysaa xoogga dabaylaha wax yeeli kara dhirta.

Dhawrista iyo ilaalinta deegaanku waxay lafdhabar u tahay nolosha dadka iyo noolaha kale oo dhan. Waa lagama maarmaan in qof walbaa xil weyn iska saaro ilaalinta deegaanka gaar ahaan ilaalinta dhirta.

B. Goobo geli xarafka ka horreeya weedha saxa ah. (10 dhibcood)

1. Cinwaanka qoraalku waa:

- a) carro-tuur.
- b) carro-guur.
- c) dabaylo.
- d) daadad.

2. Waxyaabaha dhaliya carro-guurka waxaa ka mid ah:

- a) dhirta oo la jaro.
- b) dhulka oo la beerto.
- c) xoolaha oo la dhaqdo.
- d) dadka oo wax barta.

3. Dhirtu dhulka waxay u celisaa :

- a) roobka.
- b) cawska.
- c) carrada.
- d) kulka.

4. Dhirta oo la jaro waxaa ka dhasha isbeddel ku dhaca cimilada taas oo keenta:



- a) roobab badan.
- b) dhaqaalah oo sare u kaca.
- c) dabeylo yar.
- d) abaaro.

5. Inaysan Soomaalidu deegaanka dhowrin waxaa sabab u ah:

- a) aqoon la'aan.
- b) isla weynan
- c) geesinimo.
- d) ilbaxnimo

T. Ka jawaab su'aalaha soo socda (10 dhibcood)

1. Sheeg labo qaybood oo ka mid ah meelaha dhibuhu ka soo gaaraan deegaanka Soomaalida.

- a) \_\_\_\_\_ (01 dhobic)
- b) \_\_\_\_\_ (01 dhobic)

2. Sharax kooban ka bixi waxa dhaliya carro-guurka. (02 dhibcood)

---

---

---

---

3. Sidee ayaa looga hortegi karaa Carro-guurka? (02 dhibcood)

---

---

---

---

4. Sheeg sida ugu fiican ee loo joojin karo dhirta dhuxusha laga shido adigoo muujinaya waxa lagu beddeli karo. (02 dhibcood)
- 
- 
- 
- 

5. Sheeg sida ugu fiican ee loo joojin karo bacaha isku mara dhirta qalajiyana iyagoo ka xiraya hawada adigoo muujinaya waxa dadku ku beddelan karaan si ay ugu adeegtaan. (02 dhibcood)
- 
- 
- 
- 

QAYBTA LABAAD. NAXWE (20 dhibcood)

- I. Akhri weeraha soo socda kana jawaab su'aalaha ka iman doona.
- (05 dhibcood)
1. Faahiye ama Rooble ayaa ku jira fasalka. Ka soo saar weertaan (weedhaan) xiriiriyaha ku jira. \_\_\_\_\_.
  2. Caasha waa gabar dhuuban. Ka soo saar weertaan tilmaamaha ku jira. \_\_\_\_\_.
  3. Ciise wuxuu akhriyayaa buug. Ka soo saar weertaan falka ku jira.
-

4. Axmed wuxuu u socdaa si aayar ah. ka soo saar weedhaan falkaabka ku jira. \_\_\_\_\_.
5. Isagu wuxuu ku tukanayaa masjidka. Ka soo saar weedhaan magac-u-yaalka ku jira.\_\_\_\_\_.

II. Keli ka dhig erayadaan wadarta ah. (05 dhibcood)

Tusaale: Buuro

Buur

1. Fardo \_\_\_\_\_
2. Wan'an \_\_\_\_\_
3. Ceelal \_\_\_\_\_
4. Sanbabbo \_\_\_\_\_
5. Niman \_\_\_\_\_

III. Erayada hoos ku qoran sharaxaad kooban ka bixi

(05 dhibcood)

1. Sidig: \_\_\_\_\_

\_\_\_\_\_

2. Layli: \_\_\_\_\_

\_\_\_\_\_

3. Baaqimo:

---

---

---

4. Baarqab:

---

---

---

5. Dhiil: \_\_\_\_\_

---

---

IV. Erayada hoos ku qoran iidkooda keen.

(05 dhibcood)

1. Aar: .....
2. Goroyo-cawl: .....
3. Barbaar: .....
4. Murugo: .....
5. Nayl: .....

## QAYBTA SADDEXAAD HEES HAWLEEDYO.

(10 dibcood)

Isla doono meesi kasta iyo heestiisa

Tusaale: Hees geel

Wiilan Waayeel waayo maalini  
wadaanteediyo wiil iska rogo.

Adoo raacaya tusaalah "0" ku qor xarafka ka horreeya heesta ku qoran  
jog taxa T halka u bannaan ee jog taxa B.

### Joog u tax B

### Jiif u tax T

0. Hees geel W W. Haddaan koorey koorineyno kaalinka xeryayn  
koofur hoosiyo kor waxbaa jira. (Tusaale)

1. Hees idaad \_\_\_\_\_

A. Ma caddee ha caddaado caano geel ha  
ahaado. Culimaa cuni doonta iyo caalim  
wadaada.

2. Hees riyAAD \_\_\_\_\_

B. Dhaxyar Dhuuboy dhexda ka cayaar oo  
dhagdhag u soco oo ninna ha dhibin.

3. Hees lo'aad \_\_\_\_\_

C. Garoy maaddaa waa haddii gu'gu galbo  
hooraa oo la guuraa ood gumbada  
weyn geeda mari

4. Hees Carruureed \_\_\_\_\_

D. Wanaagsane waris wayl u xalay dhalay  
wiil la moodyoo walqal lala damac.

5. Hees badar tun \_\_\_\_\_

E. Ha waalan ha waalaloobin ha waayin  
walaalo dhowr ah.

QAYBTA AFRAAD: MAAHMAAHYO

(08 dhibcood)

A. Magaca joog u taxa "B" ku aaddi maahmaahda joog u taxa "T" adoo ku qoraya tirada meesha u bannaan.

(03 dhibcood)

B T

b. Geel \_\_\_\_\_

1. Giiro geeskayga ku daaq

t. Sagaaro \_\_\_\_\_

2. Cag ku raacda iyo cad ku deeqa ayuu  
leeyahay.

j. Riyo \_\_\_\_\_

3. Harag sagaaro iiga kac mooyee iiga durug  
ma leh.

B. Maahmaahyada soo socda ku buuxi meelaha bannaan erayga ku habboon.

(05 dhibcood)

1. \_\_\_\_\_ tun la kala qalo maleh.

2. \_\_\_\_\_ nin ganay iyo nin galladayba og.

3. Dad saddex baa u liita ma-toshe, ma-tashade iyo \_\_\_\_\_.

4. Nin daad qaaday \_\_\_\_\_ cuskay.

5. \_\_\_\_\_ been waa sheegtaa beense ma maahmaahdo.

## QAYBTA SHANAAD GABAY

(16 dhibcood)

I. Akhri gabaygaan dabadeedna ka jawaab su'aalaha ka dambeeyaa.

Alleyl dumey albaabadoo la xiray uunkoo wada seexday

Onkod yeeray uugama roob alif banaatiiq ah

Iihda iga bixi baa libaax iman la moodaaye

Raggase araxda iyo ooftu waa udub dhexaadkiye

Labadii wax laga eegi jirey waa ka awdnahaye

Halkaan aa ka leeyahay Illaah keliya uun baa og

Aboodigu ma lalo garab hadduu iin ku leeyahaye

Orod uma hollado ooglihii araxda beelaaye

. . .

Nin Ugaas walaalkiis yahoo eeday baan ahaye

Afdhabaandhow aayara ninkaa amusaan ahaye.

I. Ku buuxi meelaha bannaan erayada bilaha ku dhex jira kuwa ugu habboon ama ugu saxsan. (10 dhibcood)

1. Cinwaanka gabaygu waa \_\_\_\_\_.

(Gam'i waayey, Alleyl Dumey, Ninka ilo biyo leh soo arkay, Aroos)

2. Raage wuxuu sheegay in laba xubnood udub dhexaad u yihiin jiritaanka qofka. Labada xubnood waa \_\_\_\_\_ (labada indhood, labada gacmood, araxda iyo oofta, labada dhigood)

3. Raage meesha uu ka taahayo waxa uu sheegay cidda ogi inay tahay \_\_\_\_\_ . (dadka oo dhan, isaga laftiisa, ugaaska walaalkiisa, Illaah oo keli ah, gabadha uu jecel yahay)



4. Raage wuxuu "Oogle" ula jeedaa \_\_\_\_\_ . (Dameer,

Rati, Dibi, Faras, Orgi, Gorgor)

5. Igar waxay Soomaalidu u taqaan \_\_\_\_\_. (hal ilmo aysan dhalin lagu tolo, hal maqaarka ama candha salaaxa ku godlata, hal caana badan, hal baaqimo ah)

II. Sharax kooban ka bixi tuducyada hoos ku qoran (06 dhibcood)

1. Aboodigu ma lalo garab hadduu iin ku leeyahay. \_\_\_\_\_

---

---

---

---

2. Nin Ugaas walaalkiis yahoo eeday baan ahaye. \_\_\_\_\_

---

---

---

---

3. Af dhabaandhow aayara ninkaa aamusaan ahaye. \_\_\_\_\_

---

---

---

---

## QAYBTA LIXAAD GOOGAALAYSI DHAQAMEED

(06 dhibcood)

Erayadan hoos ku qoran mid walba ku aaddi googaalaysi dhaqameedka ku habboon uuna jawaabta u yahay, kuna qor meesha u bannaan. Raac tusaalah koowaad ee lagu siiyey.

Halaq ama abeeso

Afka iyo ilkihiisa

Injirta

3<sup>da</sup> dhardhaar iyo digsiga

Qoraxda, xiddigaha iyo dayaxa

Barkinta iyo aqalka

Naasaha geela iyo haruub-gaalka

1. UI qurux badan qaadan waa: \_\_\_\_\_ Halaq, mas ama abeeso\_\_\_\_\_.

2. Mas barko oo maroodi kugu gawriirsey: \_\_\_\_\_.

3. Aqal wada aleelaysan: \_\_\_\_\_.

4. Habar belo ah, riyo boqol ah, haruub buqul ah: \_\_\_\_\_.

5. Hal madoobi hawd miratay: \_\_\_\_\_.

6. Afar gamuun god ku yoontay: \_\_\_\_\_.

7. Saddex nin oo nin waalan sida: \_\_\_\_\_.

## QAYBTA TODDOBAAD MAANSO

(05 DHIBCOOD)

Sheeg shan qaybood oo ka mid ah qaybaha maansada.

1. \_\_\_\_\_.

2. \_\_\_\_\_.

3. \_\_\_\_\_.

4. \_\_\_\_\_.

5. \_\_\_\_\_.



## QAYBTA SIDDEEDAAD CURIS

(15 DHIBCOOD)

Mid ka dooro labadaan mowduuc, ka qor ugu yaraan 35 sadar midka aad dooratid. Far qurxinta, figradaha fiican, adeegsiga erayada waaweyn iyo murtidu waxa ay ka qayb yihiin dhibcaha la helayo.

1. Beentu dhibta ay u leedahay qoyska iyo guud ahaan bulshada adduun iyo aakhiraba.
2. Dhibaatada sigaarka iyo buurigu u geystaan:
  - a. Caafimaadka bulshada guud ahaan, gaar ahaanna qofka isticmaala.
  - b. Dhaqaale ahaan saameynta uu ku leeyahay qofka iyo dadweynahaba.

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

Dhammaad

Shaqo Wacan iyo Nasiib Wanaagsan